

A.F. I. S

XEER 10 Nofember 1956, lamba. 111 rep.

Awoodaha la siiyay Madaxa Xaafiiska Golaha Wasiirada, Madaxa Xaafiiska Arrimaha Talyaaniga, iyo Madaxa Xaafiiska Qorshaynta.

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taariikhda 4 Nofember 1951, lamba. 1301, ee lagu ansixiyay iyo lagu fuliyay Heshiiska Ilaalinta Dalka Soomaaliya iyo xeerarka ku dambeeyay;

Marka uu arkay dekereetooyinka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taariikhda 9 Disember 1951, lamba. 2347 iyo 2358;

Marka uu arkay qod. 7 ee dekeeretada 18 Maajo 1956 lamba. 79, oo ku saabsan Golaha Wasiirada;

Marka uu arkay dekeretada 16 Nofember 1956, lamba. 108 ee lagu abuuray Xaafiiska Arrimaha Talyaaniga iyo Xaafiiska Qorshaynta

Marka uu Garowsaday in ay lagama maarmaan tahay in loo wakiisho oggalaashaha ee kharshka iyo saxiixa arrimaha qaarkood,

Marka uu Dhagaystay Guddiga Maamulka;

WUXUU DEKERETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Madaxa Xaafiiska Wasiirka Koobaad, Madaxa Xaafiiska Arrimaha Talyaaniga iyo Madaxa Xaafiiska Qorshaynta, mid kasta waxii iqtisaaskiisa ah, waxaa loo wakiishay, si waafaqsan talda Guddiga Maamulka sida halkaan lagu sheegayo:

- a) — si loo qaado xilka waajibaadka kharashka ee miisaniyada saaran, marka laga reebo abaalgudyada gaarka ah, kharashaadka la gaaryeelay iyo kuwa wakiilnimada; kharashaadka ku saabsan kaalmooyinka wakilashadu waxaa la isku afgartay illaa xadka ugu sarreeya oo ah Sh. So. 400;
- b) — saxiixa amarada lacag bixinta iyo dekereetooyinka ka saaridda maamul ee aan lahayn xudud lacageed;
- c) — saxiixa dhammaan waraaqaha sharci iyo tallaabooyinka, xitaa kuwa rasmiga ah, sidoo kale waraaqaha caadiga ah ee ku saabsan shaqooyinka xaafisyada iyo adegyada la diyaariyay, oo aanay ku jirin kuwa ku saabsan qorista shaqaalaha, xitaa kuwa shaqada maalinlaha.

Qod. 2

Dekereetadanu waxay baabi'inaysaa sharci kasta ee ka duwan ee ka horreeyay marka laga bilaabo taariikhda uu dhaqangalay taasoo ku began 1 Jannaayo 1957.

Muqdisho, 16 Nofember 1956.

Anzilotti

Lagu sugay lamba. 675 19 Nofember 1956.

Madaxa Xisaabaha Guud: **Tura**

La hubiyay lana Diiwaangaliya. – Diw. lamba. 20, -- bogga lamba. 117

Muqdisho, 19 Nofember 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**